



UNITED NATIONS

NATIONS UNIES

Office for the Coordination of Humanitarian Affairs – Somalia

**Warbixinta Xaaladda # 51 – 26 Desembar, 2008**

### **Isbeddellada Guud ee Ugu Muhiimka**

21kii Disembar, dab ayaa xaaqey magaalada Saakow ee gobolka Jubbada Dhexe kaas oo baabi'iyey guryihii qoysas 721 lagu qiyaasey oo ku noolaa xaafad aad loo degganaa oo magaalada Saakow ku taalla. Waxa lagu soo warramey in dabka uu hal canug uu ku dhintey oo toddobo qaangaar ahna ay si xun ugu dhaawacmeen. Dabkaa ayaa si kam ah ku kacay. NGO degaanka ah oo la yiraahdo SDIO, UNICEF iyo WFP ayaa islamarkiiba gacan ka geystey masiibada iyaga oo cunto gargaar ah iyo xirmooyin agabka gargaarka qoyska ah siiyey 721 qoys (4,326 qof) oo ku barokacay dabkaa.

Hay'adda Qaramada Midoobey ee Qaxootiga (UNHCR) ayaa dooneysa in loogu yabooho US\$92 milyan si ay wax uga fududeyso culayska haysta 230,000 oo Soomaali ku nool xerooyinka qaxootiga Dhadhaab ee waqooyiga-bari ee Kenya. Xerooyinka ayaa buux-dhaafey mana lagu dari karo qaxootiga Soomaalida ah ee dhowaan yimid. Saddexda xero-qaxooti ee hadda jira oo kala ah Ifo, Xagardheer iyo Dhagaxley ayaa la dhisey 1991dii si loo dejiyo 90,000 oo qaxooti ah. Iskahorimaadyada ka sii socda Soomaaliya ayaa keeney in ay qaxootigu si joogto ah u yimaadaan sanadahii xigey, mana muuqato in ay marna kala yaraanayaan. Sanadka 2008da oo keliya, in ka badan 60,000 oo Soomaali ah ayaa ka soo gudbey xuduudda oo soo galey Kenya. UNHCR, iyo Dowladda Kenya, ayaa wadajir u raadinaya dhul kale oo laga dhiso laba xero oo cusub, oo mid kastaba qaadi karta 60,000 oo qof.

25kii Disembar, UNICEF iyo WHO ayaa ololaha Maalmaha Caafimaadka Carruurta ka bilaabay Hargeysa, Soomaaliland. In ka badan 1.5 milyan oo carruur ay da'doodu ka yar tahay shan jir iyo haween ku jira da'dii dhalnada oo ku nool Soomaaliya oo dhan ayaa ka faa'iideysan doona xirmada daryeelka ka-hor-tagga ee la gaarsiinayo beelaha degaanka. Waxqabadyada ayaa isugu jira ilmaha oo laga tallaalo cudurrada jadeecada, qummanka, xiiq-dheerta, kojyaha iyo dabeysha; bixinta fitamiin A dheeri ah; baaritsta nafaqada; goryaan-ka-dilid; qaybinta cusbada fuuqcelinta iyo kiniiniga biyaha lagu nadiifiyo; dhiirigelinta naas-nuujinta; tallaalka kojyaha oo la siiyo gabdhaha iyo haweenka da'doodu u dhaxayso 15 ilaa 49 sano ayaa iyana jiri doonta.

Isaga oo ka hadlaya xafladdii furitaanka, Wakiilka UNICEF Soomaaliya, Christian Balsleve-Olesen waxa uu yiri "Ololahani waa mid taariikhi ah sababta oo ah waxa uu bilow u yahay istiraatiijiyad malaayiin doolar ay ku baxayso oo lagu wanaajinayo xaddiga badbaadada carruurta Soomaaliyeed. Waa ololihii ugu ballaarnaa ee aan abid fuliyo waxaana dadka la gaarayo iyo guushiisaba ay ku xiran tahay kuwa shaqada aan iska kaashanneyno. Marka aan hawsha iska-kaashanneyno waxa ay ujeeddadeenu tahay in ilmo kasta oo ay da'diida ka yar tahay shan jir aan gaarsiino waxqabadyadan saameynta sare ku leh badbaadinta nafaha. Marka aan iskaashano, waxa aan carruurta iyo hooyooyinkoodaba ka badbaadin karnaa cudurada laga hortegi karo."

**Faahfaahin dheeri ah oo Af-Soomaali ama Ingiriisi ah kala soo xiriir: Mona Mohamed on + 254 733**

**643 737 – [mohamed26@un.org](mailto:mohamed26@un.org)**

**Cinwaanka Website: <http://ochaonline.un.org/somalia>**